**XEERKA NIDAAMKA GARSOORKA CIIDAMADA**
**(D Xeer Barl . Legs 31 Marzo 1964, L. 2)**

**Qod. 1**
**Hay'adaha Garsoorka Ciqaabta Ciidamada**

1. Garsoorka ciqaabta ciidamada waxaa maamulaya:
   a) Maxkamadda Ciidamada;
   b) Maxkamadda Sare Ciidamada ( 1 x.c.h.c.).
2. Maxkamadda Ciidamada iyo Maxkamadda Sare Ciidamada xaruntoodu waa Muqdisho. Dekereto Guddoomiuaha Golaha Sare Kacaanka ayaa lagu dhisi karaa Maxkamado leh xarumo kale[1].
3. Maxkamadda Ciidamada waxay dacwadaha ku qaadi kartaa xitaa meelo ka baxsan goobaha ay xarunta ku leedahay marka loo arko in ay lagama maarmaan u tahay dardar gelinta iyo ku cibro qaadashada mamulka garsoorka ciidamada.
4. Xilliga dagaalka, dekereto Madaxweyne waxaa lagu dhisi karaa Qaybo guur-guura ee Maxkamadda Ciidamada oo loogu yeero Maxkamadda Ciidamada Dagaalka, oo leh iqtisaaska dacwadaha lala xariirinayo garsoorka ciidamada dagaalka.
Isla dekereetadaas waxaa lagu dhisyaa inta ay ka koobantahay iyo sida ay u hawlgalayaan qaybaha guur-guura.

**Qod. 2**
**Maxkamadda Ciidamada**

1. Maxkamadda Ciidamada waxay ka koobantahay Guddoomiye aan ka hoosayn darajada Dhamme ee uu magacaabo Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka kadib marka uu helo tala soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga iyo si waafaqsan talabixinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Ciidamada, waxaana laga dhex soo magacaabayaa saraakiisha Xoogga Dalka, hal ama Garsooreyaal Xiriiriyaala ah, haysta darajada Sarkaalnimada, kuwaaso ka hooseeya darjada Guddoomiyaha uu ku soo magacaaay Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka dekereeto kadib markii u arkay tala soo jeedintaasiirka Wasiirka Gaashaandhigga iyo waafaqsanaanta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Ciidamada lagana soo xulay saraakiisha Xoogga Dalka, hal ama Garsooryaalsha joogtada ah iyo hal ama Garsoorayaasha aan joogtada ahayn oo darajaahaan ka hooseey tan Guddoomiyaha, oo si aan kutalagal ahayn Guddoomiyaha Maxkamadda Cidamada ka soo xulo saraakiisha Ciidamada Qalaba sida.
2. Maxkamadda Ciidimada waxay ka garnaqaysaa iyado uu joogo Guddoomiyaha, Garsoore Xiririye ah iyo Garsoore lagala soo baxay liiska. Haddii ay dhacdo baaqasho, maqnaansho, isla jaan-qaadis la'aan ama xannibaad kale ee Guddoomiyaha, Garsooraha ugu darajada sarreeya ama ugu daraja ahaan ugu waayeelsan ayaa kusime noqonaya.
3. Guddoomiyaha iyo Garsoorayaasha Xiriiriyaasha waxay xilka haynayaan muddo aan ka yareyn laba sano, waxaana laga dhex xulanayaa saraakiisha leh waayaragnimda garsoorka haddii ay suurtagal tahay.
4. Maxkamadda Ciidan kasta, waxay ka koobnaanaysaa Xaafiiska Guddoonka, Xaafiiska Dadweyne U Doodaha iyo Xaafiska Kaalinta.

---

[1] Waxa lagu soo daray Qod. 1 Sharci L. 20, 8 Abril 1970.

5. Xilka Kaalinta Ciidanka waxaa qabanaya Saraakiil aanay darajadooda ka sarrayn Dhamme kuwaaso uu soo magacaabo Wasiirka Gaashaandhigga kadib marka uu arko tala soo jeedinta Guddoomiyaha Maxamadda Cidamada. Haddii la waayo saraakiil waxaa loo magacaabi karaa Kaaliyaasha Maxkamadda Ciidanka Saraakiil-xigeenno xilkaas u qalma[2].

**Qod. 3**
**Maxkamadda Sare Ciidamada**

1. Maxkamadda Sare Ciidamada Xarunteedu waa Magala Madaxda dalka, waxayna ka koobantahay hal Sarkaal Sare oo ka mida saraakiisha Xoogga Dalka, oo Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanku dekereeto ku soo magacaab, saddex la-taliyeyaal ciidan, oo Guddoomiyaha Golha Sare Kacaanku ku soo magacaabo dekereeto, kadib marka arko talo soo jeedinta Wasiirka Gashaandhigga iyo waafaqsanaanta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Ciidamada oo laga soo xuli suurtag ahaan sarakiisha leh khibrad garsoor, oo si aan kutalgal ahayn Guddoomiyaha Maxkamadda Sare kala soo dhex baxo Saraakiisha Ciidamada Qalabka Sida ee ku sugan xarunta. Guddoomiyaha iyo saddexda La-taliye Ciidan waxay xilka haynayaan muddo aan ka yareyn laba sano.
2. Maxkamadda Sare Ciidanka waxay garnaqaysaa marka ay joogaan Guddoomiyaha, laba Garsoore Ciidan ee la soo xushay. Haddii ay dhaacdo baaqasho, maqnaansho ama xannibaadyo kale oo ku timaadda Guddoomiyaha, xilkaas waxaa qabanaya sarkaalka daraja ahaan ugu sarreeya ama ugu daraja waayeelsan xubnaha ay Maxkamaddu Sare Ciidanka ka koobantahay.
3. Maxkamadda Sare Ciidanka waxaa ka koobantahay xaafiiska Guddoonka, xaafiiska Dadwweyne U Doodaha, xaafiiska Kaalinta, iyo xaafiiska arrimaha maamulka.
4. Waxaa lagu dabbaqayaa Maxkamadda Sare Ciidanka axkaamta ku qoran faqradda saddexaad qod. 1 ee Xeerkaan iyo faqradda shanaad ee qodobka sare.

**Qod. 3-bis**
**Ka tirsananta iyo ilbaadinta**

Guddoomiyaha Maxkamada Sare Ciidamada waa madaxa Maxkamadaha Ciidanka. Isaga waxaa hoos imaanaya ciidanka iyo xubnaha Maxamadaha Ciidamada. Guddoomiyaha Maxkamadda Sarec Ciidamada wuxuu leeyahay awoodda iqtiyaariga ee ciqaabta anshax-marinta sida ku qoran nidaamka Ciidaka Xoogga. Isagu wuxuu awood u leeyahay inuu kala baddalka dadka uu xakumo, wuxuu kalo talo ku soo jeedin karaa in xilka lagala noqdo xitaa inta aanay dhammaan muddada ugu yar e ku xusan qodobada 2, 3 iyo 5[3].

**Qod. 4**
**Xeerka quseeya Xubnaha Guddiga garsoorkala**

Dhaarta. Dhammaan xubnaha Maxkamadda Ciidamada iyo Maxkamadda Sare Ciidamada, garsoorayaasha Xeer Ilaalinta iyo kaaliyeyaasha, ka hor munaasabadda fadhiga ugu horreeya, iyo, markasta inta aanay hawsha bilaabin waxay marayaan dhaar.
Guddoomiyaha wuxuu ka hor dhaaranaya Guddoomiyaha Golha Sare Kacaanka, iyo kuwa kale waxay iyaguna ka hor dhaaranayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Ciidamada.

---

[2] Waxaa lagu beddelay Sharci L. 20, 8 Abril 1970.
[3] Waxaa soo saaray Qod. 4, Sharci L. 20, 8 Abril 1970.

Dhaartu waa sida soo socota:
«Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay in aan daacad u noqonayo Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya iyo in aan si daacada u ilaalinayo sharciga si waafaqsan mabda'a Kacaanka iyo in aan gudanayo waajibaadka xaafiiska oo idil si waafaqsan danta caddaalada oo keliyaha[4].

**Qod. 5**
**Xaafiiska Dadweyne u doodaha Ciidanka**

1. Xaafiiska Dadweyne U Doodaha Ciidanka
xaruntiisu waa Magaala Madaxda dalka, wuxuuna ka koobanyahay Xeer Ilaaliyaha Guud Ciidanka iyo laba ama ka badan ku-xigeeno. Dekereto Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka iyo tala soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga ayaa lagu dhisi karaa xaafiisyo kale oo leh xarumo kale (10,10 x.h.c.c).

2. Xaafiiska Dadweyne U Doodaha ayaa qabanaya, hawlaha ciqaabta ciidamada, dhammaan waajibaadka caadiga ee Xaafiiska Dadweyne U Doodaha caadiga uu siiyay Xeerka Nidaamka Garsoorka oo lagu meelmariyay Dekeretada Baarlamaan 12 Juun 1962, Lr.3.

3. Xeer ilaaliyaha Guud Ciidamada iyo ku-xigeenadisuu waxay xilka haynayaan mudo aan ka yareyn laba sano, waxaana laga xulanayaa haddii ay suurtagal tahay saraakiisha Xoogga oo leh khibrad garsoor, waxaana lagu magacaabayaa Dekereeto uu ku soo saaro Guddoomiyaha Golha Sare kacaanka, kadib marka uu arko tala soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga si waafaqsan tala soo jedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Ciidamada[5].

**Qod. 6**
**Xeerka fulinta, iskuduwidda iyo midaynta**

Wasiirka Gaashaandhigga ayaa wuxuu ku soo saari karaa dekereeto lagu fulinayo, la iskuduwayo iyo midaynta Nidaamkaan.

**Qod. 7**
**Nasaqidda**

Waxaa la nasaqay xeer kasta oo liddi ku ah ama aan la jaan qaadi karin Xeerkaan.

[4] Waxaa lagu beddelay Qod. 6, Sharci L. 20, 8 Abril 1970.
[5] Eeg maqaallada hore.